

# Adeegyada Heshesiinta Qoyska

*Isku Haynta Qoysaska*

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

# Adeegyada Heshesiinta Qoyska



Adeegyada Heshesiinta Qoyska (FRS) waa barnaamij akhtiyaar oo u adeega dhalinta iyo qoysaska ku jira khilaaf, kaasoo ku keeni kara dhalintu inay kala yaacaan, iyagoon raacayn shuruucda guriga, xadgudub daroogo ama walaacyo oo qoyska dhexdiisa ah. Hadafka FRS waa in la ilaaliyo, xoojiyo, heshiisiiyo qoysaska lagana hortago ka maqnaanshaha dhalinta guriga.

Barnaamijku:

- u adeega dhalinta, da'da 12 ilaa 17.
- Raadiya inuu horumariyo xirfadaha iyo taageerooyinka qoysaska si loo xaliyo dhibaatooyinka la xiriira dhalinyarada, caruurta u baahan adeegyada ama khilaafka qoysaska.
- Ilaaliya oo xoojiya midowga qoyska.

Waalidiinta ama dhalintu waxay ka codsan karaan FRS iyagoo ka wacaya khadka dhexe 1-866-363-4276. Daryeel bixiye, shaqaale kiis, shaqaale kiis DCYF, sharci dejinta, Xarunta HOPE, Xarunta Mushkiladaha Hoyga (CRC) ama hoyga dhalinta habeenkii ayaa sidoo kale wici kara iyagoo matalaya dhalinyarada ama waalidka si loo codsado adeegyada.

Shaqaale bulsho ayaa kulasoo xiriiri doona qoyska 24 saac gudohood hawsha kiiska, oo aanay ku jirin maalmaha fasaxa todobaadka iyo fasaxyada, si loo qorsheeyo wareysi iyo qiimeynta. Shaqaalaha bulshada, dhalinta iyo qoysku waxay ka doodi doonaan khilaafka hada iyo khayraadka la heli karo si loo xaliyo kala duwanaanshahooda.

Adeegyada waxa loogu talo galay inay isku keenaan dhalinta iyo waalidiinta. Adeegyada waxa ku jiri kara aanse lagu koobin:

- Qiimeyn Qoys
- Adeegyada farogalinta qoyska mudada gaaban
- Gudbinaha daaweynta xadguudka daroogooyinka iyo/ama latalinta
- Gudbinaha adeegyada caafimaadka maskaxda oo ay ku jiraan Wraparound oo leh Adeegyada Degdega (WISe) haday khuseyso.
- Caawimada qorista Dhalinta Khatarta ku jirta (ARY) ama Cunug u Baahan Adeegyada (CHINS) afti, marka la codsado

# Doorashooyinka Dhalinta iyo Waalidiinta

## Qiimeyn Qoys

Qiimeyn qoysku waxay soo ururin doontaa macluumaadka si loo helo faham balaadhan oo awoodaha, baahiyaha iyo khayraadka qoyska ah iyo saameyntooda khilaafka qoyska hada. Qiimeynaha waxa lala dhameystiraa shuraakada waalidiinta iyo dhalinta si loo aqoonsado khayraadka bulshada iyo/ama adeegyada DCYF si loo taageero yareynta khilaafka qoyska loona ilaaliyo midowga qoyska. U gudbinta khayraadka waxa ku jiri kara adeegyada farogalinta qoyska mudada gaaban, Qiimeyn xadgudubka daroogada, adeegyada caafimaadka maskaxda iyo WISe.





# Dhalinta Khatarta ugu jirta (ARY)

Sharciga Gobolka Washington wuxuu ku sharxayaa Dhalinta Khatarta ugu jirta (ARY) danbi-caruureed:

(a) Kasoo ka maqan guriga ugu yaraan 72 saacadood oo xidhiidha bilaa ogolaanshaha waalidka dhalinta;

(b) Kasoo ka baxsan xakameynta waalidka dhalinta ilaa hab-dhaqanka dhalintu khatar galiyo caafimaadka, badqabka ama wanaaga dhalinya ama qofkale; ama

(c) Kasoo leh dhibaato xadugudub daroogo oo aanay jirin eedaymo danbi oo socda lana xiriira xadugudubka daroogo.

Qiimeyn qoyska waa in la dhameystiraa ka hor intaan la buuxin aftida ARY. Aftidani waxay u ogolaanaysaa waalidka ama masuulka sharci inuu ilaaliyo daryeelka dhalinyarta intuu raadinaayo caawimada danbiga caruurta ee maxkamada dajinayana shuruudo macquula oo dhalintu raacdo. Tani waxa ku jiri kara uga baahashada dhalinyarada inuu ku lug yeesho barnaamijka waxbarasho, isagoo raacaya shuruucda qoyska kana qeybgalaaya adeegyada latalinta. Maxkamadu waxay amri kartaa waalidku inuu ka qeybgalo latalinta ama adeegyada kale marka la damaanad qaadayo ARY. Waalidku maaliyad ahaan wuxuu masuul ka noqon doonaa kharashaadka la xiriira qorshaha amarka maxkamada.

# Cunuga u Baahan Adeegyada (CHINS)



Marka latalinta, la noolaanshaha qaraabada ama dadaalada la midka ah ku guul daraystaan inay xaliyaan khilaafka u dhaxeeya dhalinta iyo waalidkooda oo dhalintu u baahan tahay in laga saaro qoyska, dhalinta ama waalidku waxay qoran karaa aftida CHINS.

Sharciga gobolka Washington wuxuu ku sharxayaa Cunug u Baahan Adeegyo sida danbi caruureed:

(a) Kasoo ka baxsan xakameynta waalidka dhalinta ilaa hab-dhaqanka dhalintu khatar galiyo caafimaadka, badqabka ama wanaaga dhalinta ama qofkale;

(b) Lasoo wariyey sharci fulinta inuu ka maqnaa ogolaansho la'aan ugu yaraan 24 saac oo xidhiidha labo ama marar ka badan oo kala gaara guriga labada mid uun waalidka, CRC, meelaynta dibada hoyga ama maaleynta amarka maxkamada; iyo

(i) Muujiyey dhibaato xadugudub daroogo daran; ama

(ii) Muujiyey hab-dhaqan abuuraya khatar waxyeelo u daran caafimaadka, badqabka iyo wanaaga cunuga ama qofkale; ama

(c) (i) Yaa u baahan:

A. Adeegyada daruuriga ah waxa ku jira cunto, hoy, daryeel caafimaad, dhar ama waxbarasho; ama


B. Adeegyada waxa loo diyaariyey in lagu ilaaliyo ama dib loogu mideeyo qoyska;

(ii) Aan haysan helitaan ama diiday inuu ka faa'idaysto adeegyadan; iyo

(iii) Waalidiintiisu cadeeyeen sii wadida lakiin dadaalo aan midho dhalin si ay u ilaaliyaan qaabka qoyska ama aanay awoodin ama rabin inay sii wadaan dadaalada lagu ilaalinaayo qaabka qoyska; ama

(d) Kaasoo "galmo ahaan uga faa'idaystay cunuga."

Waalidiintu waxay qoran karaan aftida CHINS marka shuruudaha khuseeya dhalinyarada lagu dajiyey qayexitaanka sare la helo. Dhalinta ama shaqaalaha bulshada DCYF waxay qoran karaan aftida CHINS hadii mid ka mida shuruudaha sare jiraan, gaar ahaan hadii waalidku aanu u ogolaan dhalinyaradu inay ku noolaadaan guriga waalidka oo aanu ama awoodin inuu diyaariyo meel kale oo dhalinyaradu ku noolaato.



Qofka buuxinaya aftidu waa inuu muujiyaa inuu isku dayey inuu xaliyo khilaafka, dhamaan wixii macquula la isticmaalay oo ay u wanaagsan tahay dhalinyaradu inay ku noolaadaan dibada guriga inta qoysku sii wado xalinta khilaafka. Qiimeyn qoyska ee shaqaalaha DCYF waa in la dhameystiraa ka hor intaa la buuxin aftida CHINS.

Hadii maxkamadu ansixiso meelaynta dibada guriga, dhalinyaradu waxay caadiyan la noolaan doonaan qaraabada ama saaxiib qoyska ah. DCYF waxay kormeeraysa meelaynta iyo xarumaha gudbinta adeegyada kaliya hadii cunuga la geeyo guri liisaan daryeel leh ama qaraabo aan looga baahneyn liisan. Hadii maxkamadu gayso dhalinta cid aan qaraabo ahayn, guri bilaa liisan ah, DCYF waxay xidhaysaa kiiska waxayna ogeysiinaysaa maxkamada talaabadaasi. Waalidiinta ama DCYF waxay codsan karaan diidmada dacwada maxkamada CHINS hadii adeegyada aan la bixin karin maxaa yeelay:

(a) Dhalintu waxay ka maqnayd meelaynta maxkamadu ansixisay 30 cishoo xidhiidha ama ka badan;

(b) Waalidiinta ama dhalinta, ama dhammaantood, diida inay la shaqeeyaan farogalinta la helayo, ee ku haboon loolana jeedo mideynta qoyska; ama

(c) DCYF ayaa isticmaashay dhamaan khayraadka diyaarka ah ee ku haboon ee keeni kara dib u midow.

Maxkamadu waxay qaban doontaa dib u eegis dhageysi 90 cisho gudohood si ay u hubiso horumarka qoyska ee dib u mideynta. Hadii dhalintu aanay kusoo noqon karin guriga marka dib u eegista dhageysigu dhaco, dhalintu waxay kusii jiri karaan ilaa lix bilood. Maxkamadu waxay ku amri kartaa waalidiintu inay ka qeybgalaan adeegyada dib loogu mideynaayo qoyska isla marka ay macquul noqoto.



# Khayraadka bulshada

## Adeegyada Daaweynta

Xaaladaha degdega ee nolosha halis galinaya, wac 9-1-1. Si aad u raadisid adeegyada hab-dhaqanka caafimaadka, fadlan kala xiriir Adeega gudbinta Caafimaadka Maskaxda Govolka Washington 1-833-303-5437 oo ku xirnow khabiirka gudbinta. Caruurta caafimaad ahaan ku haboon iyo dhalinyarada ilaa 21 sano jirka ah da'da ee leh baahiyo hab-dhaqan kakan waxay ku haboonaan karaan taageeroyin dheeriya oo loo maro Wraparound leh barnaamijka Adeegyada Degdega (WISe). WISe waxa lagu bixin karaan guriga iyo bulshada.

Hadii qof ka fikiraayo ismiidaamis, fadlan kala xiriir Khadka ka Hortaga Ismiidaaminta 1-800-273-8255.

Macluumaad dheeriya oo khuseeya caafimaadka maskaxda ama barnaamijka ku tiirsanaanta kiimikada, dhalinyarada ama waalidiintu waxay ka wici karaan 24 Saac Khadka Caawimada kasoo Kabashada Washington 1-866-789-1511. Khadka caawimadu wuxuu bixiyaa farogalin mushkiladeed oo asturan qarsoodina ah iyo adeeg gudbin dadka degan gobolka Washington.

Walaacyada xadugudbka caruurta iyo dayacaada ama Cunuga Galmo ahaan Looga Faa'idaystay (CSEC), la xiriir 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276).

*Hadii aad jeclaan lahayd nuqulka dukumentigan oo qaab ama luuqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Xiriirka Gobolka (1-800-723-4831 | 360-902-8060,* ***ConstRelations@dcyf.wa.gov****).*

DCYF PUBLICATION CWP_0037 SM (03-2021) Somali